

Xirfadaha uu baranayo ilmahaagu

Ilmahaagu wuxuu marbamarka kadbaysa noqonayaa mid wax walba isku tijaabiya oo madax banaan. Da'dan wax yar buu ilmahaagu ka fahansanyahay khatarta. Waxyaabaha uu jecelyahay uu waqtiga isku dhaafiya waxa ka mid ah fuulista. Sida ugu fiican ee dhaawaca lagaga hortiga karaa waa qof weyn oo dusha ka ilaaliya.

Walwalka ugu badan ee badbaadada

- Ka soo dhacida baaskeelka, iskuutarka, qalabka garoonka ciyaaraha iyo guriga.
- Caruurta ka yar shan sanno waxay gaarahaan khatar ugu yihiin qaniinyada eeyda inta badana waxay u baahdaan daaweyn Isbitaal.
- Xagga dambe ee haradu waa dilaaga ugu weyn ee caruurta ka yar shan sanno.
- Dhaawaca gubashada ka yimaadaa waa ka ugu dheer ee Isbitaalka loo galo astaan muddo dheer jirtana reebta.
- Shilalku waxay inta badan ka dhacaan caruurta iyadoo ordaya wadada ka talowda ama wadad ku ag ciyaaraysa.

Guriga

- U bilow ilmahaaga barista badbaadada guriga agtiisa.
- Ha ka tagin baagaga wax lagu soo iibsado oo ay ku jiraan Jeermis dilayaashu, milanada weelka lagu dhaqo iyo waxyaabaha wax lagu nadiifiyo ee meelahaas ag yaalla. Waxyaabahaas si sahlan ayey caruurta wax xiisaynaysaa u gaari kartaa.
- Daawada meel sare ka saar, oo aanay caruurta gaari Karin oo qufulan. Dawadu waxay moodaan nacaanac. Midab bay leedahay soo jiita.
- Ka fogee kabriidka iyo waxyaabaha sigaarka lagu daarto ee ay gaari karaan.
- U samee qorshaha ka fakadka dabka matalan haddii ay dhacdo xaalad degdeg ahi si joogto ahna u samee isku dayayadaas.
- Bar ilmahaaga **HOOS ISKU GAABI** iyo **SOCO, SOCO, SOCO** marka uu dab qabsado iy siduu u joogsan lahaa, **ISU TUURI LAHAHA IYO SIDUU ISU ROG ROGI LAHAA** Haddii ilmaha dharkiisa dab qabsado.
- Isticmaal muryada badbaasan ee daaqada iyo albaabka hooseeye ama halka uu xubka muraayada firirka ka ilaaliyaa ku yaalo.
- Ku badel wixii muraayad jaban ah mid badbaadsan.




Ciyaarta

- Dooro qalabka ciyaarta ee ku haboon da da ilmahaaga, qiyaasta iyo heerka horumarkiisa.
- Shiraacyada ama darbaalyadu waxay noqon karaan qaar halis ah! dhulka dhig shiraaca waxna dulsaar wixii isbiriin bir ah. Sharciguna waxa weeye: hal ilma ahi oo kaliye isticmaalo markiiba!
- libso Helmetka caruurta. Hubi inay si fiican u gashanyihiin markastan la xirnaado kuna khasab inay xirtaan markastoo ay fuulaan baaskeel, Iskayt boodh, ama skuutarr.
- Dhig waxyaabaha wax nuuga qalabka caruurta hoostiisa.
- Laamaha gaagaaban ee dhirta ka jir meelaha gaaraya meel la siman caruurta indhahooda.
- U xir ilmahaaga dhar khatartoodu yartahay.
- Bar ilmahaaga siday si bedbaada leh ula ciyaari lahaayeen eeyda. Ka fogee caruurta meesha ay eeydu wax ku cunayso.



Wadada

- Mar kasta gacanta qabso ilmahaaga markay wadada u dhowyihiin un sharax wuxuu ilmahaagu iska fiirinayo.
- Bar ilmahaaga **JOOGS, FIIRI IYO FIKIR**
- Waligaa ha u ogolaanin ilmahaaga inuu Baaskeel, Iskaytboodh ama Iskuutar wadada.



Baabuurka dhexdiisa

- Waligaa hagaga tagin ilmaha baabuurka keligii. Heer kulka baabuurka gudhihiisu wuxuu kordi karaa in ka badan 30°C mud shaniyo toban daqiiqo ah, ilmahaaga sii qaado – xitaa haddiiaad wax yar soo qabsanayso.
- Kursiga caruurta ee ku haboon isticmaal safar kasta – kursiga las soojeediyo ayaa haboon ilaa uu ilmahaagau yar korayo oo uu culayskiisu gaarayo ilaa 18kiiloo.
- Hubi in suumanka kursigu si fiican ugu xirmayaan ilmaha dharka xagaagii la xirto ee khafiifka ah ayaa haboon haddii la geejinayo suumanka.
- Sii sharaab farabadan oo qabow si aad uga hor tagto biyah ka baxa jirka.
- Dharka si fiican ugu xir si aa uga ilaalisid dabaysh dharka kala dhexgelaysa.



safe kids now Tilmaamaha guud ee badbaadada

1. Bar ilmahaaga ka feejignaanta biyaha iyio sida ay u dabaalan lahaayeen. Ka diiwaan geli casharada xirfadaha dabaasha.
2. U iibi helmetka, qalabka lagu ilaaliyo suxulka, jilibka iyo gacamaha marka uu ilmahaagu fuushanyahay lucbadaha shaagaga leh.
3. Iska diiwaan geli barnaamijka dab demiska ee Melbourne (Melbourne Metropolitan Fire and Emergency Board 'Fire Ed' programs).
4. U bilow badbaadada codka wadooyinka iyo dabecadhooda.
5. Samayso qorsha badbaadada ee qoyskaaga tusaale ahaan haddii uu dab dhaco.
6. Weydii dawlda hoose inuu xaydaanka ganjeelda is xirtaa waafaqsantahay sharciga.
7. Sameyso xeerar marka aad ag joogtid harada dabaasha agteeda.
8. U samee caruurta xeerar ka fogeeya marka ay eeyadu wax cunayaan.
9. U iibi caruurta Lucbadaha ku haboon da'dooda iyo horumarka ilmahooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir

Kalkaalisada hooyada iyo dhalaanka laynka 24 saacadood	13 22 29
Xaruntalsbitaalka Rooyal ee qalabada kala duwan ee badbaadada	9345 5085
Xarunta macluumaadka sumowga	13 11 26
Talada VicRoadska ee isticmaalka kursiga caruurta	1300 360 745
Kuraasida caruurta yar yar ee baabuurta (Xirfada rakibaada iyo adeegeeda)	1300 728 363
Hayada badbaadad noloshu Fiktooriya korasyadeeda calaamadaha harada dabaasha (Royal Life Saving Society of Victoria for CPR courses and a pool sign)	9568 5822
St John's Ambulance koosoyinkiisa kala duwan ee gargaarka deg dega ah	9696 0000

TILMAAMO FIICAN OO KUU SHEEGAYA HELMATKA BADBAADAN EE AAD ILMAHAAGA U IIBINAYSID

Waxa arrintan soo jeediyey **ROSEBANK**. Waaxaanu si weyn u taageeraa badbaadada caruurta (Kidsafe)

Sideebaan ku ogaan karaa qiyaasta Helmetka ilmahaaga le eg?

- Isticmaal mitirk qiyaasta qiyaasna madaxa ilmaha meel in yar ka sareysa Indhaha iyo dhegaha.
- Kaas ku qiyaas qiyaasta Helmetka ee k u muujisana sanduuga si aad u hesho qiyaas la mida.

Waa maxay waxyaabahaan aan ka fiirin karaa Helmetka ilmaha ee baaskeelka?

- Waxa ugu muhiimsan, inaad eegto heerka Australia ee '5ta' calaamadood ee saxa ah ee astaanta ansixinta. inta badan waxa lagu muujiyaa kartoonka uu Helmetku ku jiro. Astaantaasi waxay muujinaysaa inuu Helmetku ka gudbay tijaabadii la mariyey buuxiyeyna shuruudahii badbaadada ee looga baahnaa sharciyada wadada eeDawlada Australia. Helmet kastaa ma buuxiyo heerka loo baahanyahay!
- Dahaadh Helmetka, gaar ahaan caruurt yar yar.
- Caruurta aad u yar yar ee ka yar hal sano, waxa laga yaabaa inaanay muruqyada luquntoodu xoog badnayn si ay u hayso Helmetka , talo weydiiso takhtarka caruurta qaabilsan.
- Midabka dhalaalaya wuxuu kordhinayaa fursada ay ku arkaan dadka kale ee baaskeelka fuushan, lugaynaya iyo kuwa baabuurta wada.
- Waxa kale oo lagu talinayaa in helmetku yeesho meel hawadu ka soo gasho si madaxa ilmaha u qaboojiso.
- Faashadaha xagga hoose laga geliyo helmetku oo dheeraad ahi waa muhiim, gaar ahaan markuu ilmuhu si korba, taas oo sii dheeraynays isticmaalka helmetka.
- **MUHIIM!** – helmetku mar walba waxa ka celinmaayo qofka xiran wixii shil ah ee soo gaara, markaas si helmetku si fiican wax u ilaaliyo waa inuu si fiican u le'eg yahay si bedbaado lehna u xiran yahay.

